

Xidhiidhka si ka wanaagsan, dhakhsa badan, caymis baabuur oo la awoodi karo

November 25, 2024 [Weydiimaha warbaahinta](#)

Dowladda Alberta waxay furtay shabakad, care-first.alberta.ca, ku saabsan qorshayaasha gobolka ee horumarinta, degdegga ah iyo caymiska baabuurta oo ka jaban.

Bada sano ee soo socota, nidaamka caymiska baabuurta ee Alberta wuxuu mari doonaa isbeddello la taaban karo. Si loo hubiyo in **reer** Alberta ay haystaan macluumaadka ay u baahan yihiin si ay u fahmaan u wareegitaanka nidaamka cusub ee Care-First, dowladda Alberta waxay bilawday shabakad si ay u sharaxdo isbeddelada iyo faa'iidooyinka.

Websaydku wuxuu diiradda saarayaa sharraxaadda sida nidaamka cusub ee caymiska baabuurku u bixin doono faa'iidooyinka taageero dhaqaale iyo caafimaad oo wanaagsan. Marka loo eego nidaamka daryeelka diiradda lagu saarayo, faa'iidooyinkaas waxay socon doonaan ilaa muddada soo kabashada buuxda ee reer Alberta ku dhaawacmay shilalka. Intaa waxaa dheer, reer Albertan waxay lahaan doonaan kayd kharash ilaa \$400 sanadkii marka loo eego nidaamka cusub.

"Waxaan hubineynaa in reer Alberta ay lacag ku keydsan doonaan caymiska baaburkooda marka nidaamka cusub ee Care-First la hirgeliyo, waxaana rabnaa inaan siino macluumaadka ay u baahan yihiin ee ku saabsan sida faa'iidooyinkooda loo kordhinayo oo dhaqso leysu gaarsiin doono."

Nate Horner, Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda iyo Wasiirka Maaliyadda

"Dhakhaatiirta lafdhabarta ayaa qayb weyn ka ah caawinta dhibbanayaasha shilalka inay helaan daryeelka ugu fican oo ay soo celiyaan tayada noloshooda. Dib-u-habaynta dowladda Alberta ee caymiska baabuurta waxay naga caawisaa inaan siino daryeelka xanuunka loo yaqaan 'chiropractic care' xagga kuwa u baahan."

Dr. Jacqueline Boyd, guddoomiye, Ururka Chiropractic ee Alberta

Sharciga lagu hirgelinayo isbeddellada ayaa la soo bandhigi doonaa guga 2025. Haddii la ansixiyo, wada-hawlgalayaasha warshaduhu waxay qaadan doonaan labada sano ee soo socota si ay u hirgeliyaan isbeddellada, oo ay ku jiraan horumarinta 3.4 milyan oo caymis baabuur oo cusub.



Siidayn warbaahineed

Xaqiiqooyinka Dhaqsaha leh

- Dowladda Alberta waxay Kanada ka hirgelin doontaa qaabka ugu horreeya ee sida gaarka ah loo bixiyo ee Care-First.
- Nidaamka caymiska baabuurta ee Care-First wuxuu jiri doonaa Janaayo 2027.

Macluumaad la xidhiidha

- [Webseydka Care-First](#)
- [Foomka caymiska baabuurta](#)
- [Isbeddellada warbixinnada caymiska baabuurta gudaha Alberta](#)

Weydiimaha warbaahinta

[Justin Brattinga](#)

587-357-2956

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga Lacagta iyo Maaliyadda